Oregon Health Authority



XAASHIDA XAQIIQDA
Tallaalka Meningococcal B

Waxa uu yahay tallaalka Meningococcal B (MenB)

Cudurka meningococcal waa mid aad u yar laakiin ah cudur halis ah oo ay sababto bakteeriyada *Neisseria meningitidis.* Waxaa jira 13 nooc oo ah *N. meningitidis,* oo loo yaqaan "serogroups." Kooxaha bakteeriyada Serogroups A, B iyo C ayaa keena inta badan cudurka meningococcal, inkasta oo qayb ka mid ah dhacdooyinka jiro ee ay sababaan W, X iyo Y sii kordhayaan. Tallaalada Serogroup B meningococcal (MenB) waxay ka hortagi karaan cudurka meningococcal ee uu sababo serogroup B.

Sababta ay tahay in aad u qaadato tallaalka

- Ku dhawaad 10 qof ee kasta ee uu helo cudurka meningococcal ayaa u dhinta.
- Kuwa badbaada, qiyaastii 10 ilaa 20 oo ka mid ah 100-ka qof waxaa soo gaari doonta naafanimo sida maqalka oo ka luma ama gacan/lug ay beelaan, dhaawac ka soo gaara maskaxda ama kalyaha, dhibaatooyin soo gaara habdhiska maskaxda, ama xagtin aad u daran oo ka soo gaarta maqaar la daboolay.
- Xataa dadka caafimaadka qaba ayaa qaadi kara cudurka meningococcal; dadka qaar ayaa halis dheeraad ah ugu sugan. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saasban cida halista dheeraadka ah ugu sugan, booqo healthoregon.org/mening.

Tallaalada MenB marka loo eego tallaalada caadiga ah ee meningococcal

- Men B qofka kama illaaliso kooxaha bakteeriyada serogroups A, C, W iyo Y.
- Tallaalada caadiga ah ee meningococcal waxay qofka ka ilaalin karaan kooxaha bakteeriyada serogroups A, C, W iyo Y.
- Marka la joogo Oregon, tallaalka lagula talinayo ardayda kulliyadu wuxuu daboolaa kooxaha A, C, W iyo Y.
- **Ha u** qaadan in uu shaqayn doono tallaakii hore ee caadiga ahaa ee qoor-gooyaha 'meningitis' uu ku ilaalin doono haddii mas'uuliyiinta caafimaadka ku taliyaan tallaalka MenB marka ay jiraan dhacdooyin ama cudur ka dillaaco meel kuu dhow.

Tallaalada Serogroup B meningococcal (MenB)

Laba tallaal MenB – Bexsero® iyo Trumenba® – ayaa ruqsad loo haystaa Maraykanka dhexdiisa.

Tallaaladan kaliya waxaa lagula talinayaa dadka da'doodu tahay 10 sano ama ka weyn tahay ee halista dheeraadka ah ugu sugan infekshanka serogroup B meningococcal. Kooxahan waxaa ka mid ah:

- Dadka halista ku sugan sababtoo ah iyadoo ay dillaacday serogroup B meningococcal
- Qof kasta oo xubin calooshiisa ka midka ah 'spleen' uu dhaawac soo gaaray ama laga saaray
- Qof kasta oo qaba xaaladda habka difaaca jirka ee loo yaqaan "waxyaalaha dheeraadka ah ee joogtada ah ee dhiman"
- Qof kasta oo qaadanaya daawada lagu magacaabo eculizumab (sidoo kale loo yaqaan Soliris®)
- Khabiirada shaybaarka ee sida caadiga ah uga shaqeeya go'doominta *N. meningitidis*

Daryeel caafimaad bixiye ayay noqon doontaa in uu qiimeeyo heerka halistaadu le'eg tahay iyo baahida aad u qabto tallaal. Tallaalada MenB sida caadiga ah waxaa la heli karaa kaliya marka uu dhakhtarku qoro.

Tallaalada MenB labadooduba waxaa loo baahan yahay wax ka badan hal qiyaas 'dose' si loo helo ilaalin buuxda.

- **Bexsero** waxaa loo baahan yahay laba qiyaasood 'doses' oo ay ugu yaraan 30 maalmood u dhaxayso.
- **Trumenba waxaa loo baahan yahay saddex qiyaasood 'doses'** marka cudurku goob ka dillaaco: Qiyaasta 'dose' labaad waa in la isa siiyaa 30 maalmood ka dib qiyaasta 'dose' u horeysa. Qiyaasta 'dose' saddexaad waa in la isa siiyaa shan bilood ka dib marka ta labaad la isa siiyo.

Dadka qaarkood ma aha in ay qaataan tallaalada MenB

Qofka ku siinaya tallaalka ayaa kaa caawin doona in aad go'aansato haddii ayna ahayn in aad qaadato tallaalka MenB. Si aad u hesho talada saxda ah, u sheeg qofka tallaalka ku siinaya haddii aad qabtid xasaasiyad/aleerjig aad u daran ama nafta halis gelinaya, ama haddii aad uur leedahay.

Haddii aad qabtid xanuun aan darnayn, sida hargab, waxay u badan tahay in aad tallaalka heli karto maanta. Haddii aad si dhexdhexaad ah ama aad u daran u jiran tahay, waxay in aad sugto ilaa iyo inta aad ka bogsoonayso. Dhakhtar ayaa talo ku siin kara.

Falcelisyada/saameynta suurta galka ah ee tallaalka

Daawo kasta, oo uu ka mid yahay tallaalku, waxay leedahay fursad ay ku yeelan karto falcelisyo/saameyn. Sida caadiga ah waa kuwo aan darnayn oo iskood isaga taga. Falcelisyo/saameyn aad u xun ayay suurta gal tahay in ay yeelato iyadoo caadi ahaan dhacda dhowr saacadood gudahood tallaalka ka dib. Falcelisyada/saameynta uu keeno tallaalku waa kuwo marar dhif ah dhaca. — qiyaastii 1 marka la isticmaalo qiyaas 'doses' dhan 1 malyuun.

Wax ka badan kala bar dadka qaata tallaalka serogroup B meningococcal ayay ku yeelataa **falcelisyo/saameyn aan darnayn** ka dib tallaalka. Falcelisyada/saameynta noocan oo kale ahi waxay socon karaan ilaa toddoba maalmood waxaana ka mid ah:

- Xanuun, guduudasho ama barar meesha tallaalka laga qaatay
- Caajis ama daal
- Madax xanuun
- Muruqyada ama isgoysyada jirka oo xanuuna
- Xumad ama qarqaryo
- Lalabo ama shuban

Haddii aad u malaynayso in aad qabto xasaasiyad/aleerjig aad u daran ama xaalad kale oo degdeg ah, wac 9-1-1 waxaanad aadaa isbitaalka kuugu dhow. Haddii kale, wac xaruntaada caafimaadka. Badbaadada tallaalka waa lala socdaa. Wixii macluumaad dheeraad ah, booqo www.cdc.gov/vaccinesafety/.

Talooyinka laga helayo mas'uuliyiinta caafimaadka marka uu cudurku dillaaco

Marka uu cudurku dillaaco, mas'uuliyiinta caafimaadka ayaa laga yaaba in ay soo jeediyaan talooyin gaar ah oo ku aadan cudurka dillaacay oo ay ka mid yihiin cida ay tahay in la tallaalo, nooca tallaalka la isticmaalayo, iyo in la qaado shuruudaha looga baahan yahay daawada la isku qoro ee kooxaha qaarkood ee halista ugu sugan cudurka.

Mas'uuliyiintu waxay go'aankooda ku saleeyaan dhowr arrimood. Kuwa ugu muhiimsani waa:

- Waxa uu sayniska inooga sheegayo ee ku saabsan cida halista u badan ugu sugan cudur dillaacay oo gaar ah
- Imisa qiyaasood 'doses' ayay shirkadaha daawooyinka soo saara iyo hawlgalayaasha kale ee caafimaadku bixin karaan
- Xaaladaha dillaaca cudurka sida goobta, wakhtiga iyo suurta galnimida in dadkaasi helaan tallaalka

Oregon Health Authority
WAAXDA CAAFIMAADKA DADWEYNAHA
Ka hortagga Cudurada Daran ee la isku Gudbiyo
971-673-1111

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. La xiriir Ka hortagga Cudurada Daran ee la isku Gudbiyo 971-673-1111 ama email u dir ohd.acdp@state.or.us. Waa aqbalnaa wicitaanada gudbinta oo dhan ama waxaad wici kartaa 711.